# Waad ku mahadsantey inaad dib uga faa'iidaysanayso!

SOMALISKA

Wax wayn ayaa dhaca mar kasta oo aad baako iyo xaanshida-wargeysyada dib uga faa'iideysi awgeed u xaraysid. Daboolkii quraradaha waxay noqdaan musmaaro. Baakadii oomada ku jiri jirtay waxay noqonaysa kartoon qurux badan oo kabaha lagu keeno. Xaanshida wargeysyada hore waxay noqonayasa mid cusub oo la akhristo. Sidaas ayee kaalin wayn ugu geysan karta keydinta tamarta. Waxaad sidaas oo kale uga hortegaysa in khayraadka dabiicigi ahi ka lumin wareega silsilada. Adigu dartaa ayay bay'adu guulaysanaysaa. Adigu na wax un baad ka faa'iideysanaysa. Mar kasto oo aad khashinka dib uga faa'iideysato.

## Baakeedada iyo xaanshida wargeysyada oo ku jira silsilad wareeg ah

Dhamaan baakooyinka iyo xaanshida wargeysyada oo idil, waa la soo uruuriyaa sidii dib looga faa'ideysto, oo baakooyinka ama wax soo saar cusub loogu dhigo. Baakooyinka balaastikada waxaa tusaale ahaan laga sameeya, qalabka buuqa hoos u dhiga, buraashayada maacuunta lagu dhaqo, dheriga dhirta iyo bacda raashinka lagu keydiyo. Quraaradaha, xaanshiyadaha culus, iyo baakooyinka xaanshida ka samaysan waxaa badi ahaan laga sameeya baakooyin cudayb ah. Baakooyinka birta ka samaysan waxaa laga soo saari kara xadiidka tareenada. Xaanshida-wargeysyada la akhristey waxay noqonayaan xaanshida-wargeysyo cusub.

## Masuuliyada soo-saareha

Dowladda waxay go'aamisay in shirkad kasta oo soo saarta, dalka soo gelisa, buuxisa ama iibisa baakooyinka ama badeecado baakoooyin ku jira, waxaa xil-saaran jiritaanka goobta uruurinta, goobtaaso macaamisha dib uga faa'iideysi awgeed, baakooyinka dib ugu soo celin karaan. Taasi waxay la magacbaxday masuuliyada soo-saareha. Isla sidaas ayaa loola dhaqma xaanshida wargeysyada iyo xaanshida dib loo soo celiyay. Shirkadaha soo saara ama soo geliya ama dalka keena xaanshida-wargeysyada iyo daabaco, waxaa iyagana saaran masuuliyada soo ururinta, iyo dib uga faa'iideysiga xaanshida dib loo soo celiyay. Baakadaha iyo xaanshida-wargeysyada waa labada badeecooyin ee ugu horeeya oo loo yeelay masuuliyada soo-saareha. Soo-saareyaasha baakooyinka iyo xaanshida dib loo soo celiyay way wadashaqeyaan, waxayna la magac baxeen FTI (Förpacknings- och Tidningsinsamlingen). Waa waxqabad aan ganacsi ku salaysnayn.

## Goobaha did uga faa'iideysiga

FTI waxay maamulaan dhamaan goobaha dib uga faa'iideysita, ee ku yaala Iswidhan oo idil. Waxaad geynaysaa halkaa khashinka xaanshida wargeysyada lyo baakooyinka balaastikada, xaanshida, birta iyo qurraarada laga sameeyay. Haddii aad degantey guri dabaq ah oo leh meel lagu keydiyo wargeysyada halkaas ayaad geynaysaa. Waxay FTI la shaqeysaa qandaraaslayaasha intooda badan oo halkaa ka soo qaadaaya. Waa balanqaadka in wax walba dib looga faa'iidaysan karo.

## Macluumaad dheeraad ah

Boggayaga www.ftiab.se/hitta-atervinningsstation ayaad ka heli kartaa goobta dib uga faa'iidaysiga ee kuugu dhow iyo goorta la faaruqiyo ee la nadiifiyo marka xigta. Halkan waxa kale oo aad ka heli tilmanta sida loo kala saaraayo, filimada dib u uga faa'iideysiga, tusaale iyo talooyin iyo warbixin ku sabsan waxqabadkayaga.

Waxa kale oo aad nagala soo xidhiidhi kartaa emaylkayaga info@ftiab.se ama tel 0200-88 03 11 halkaas oo aad su'aashaada jawaab ka helayso.

**Marka laga hadlaayo qashinka kale** sida qashinka isku jira, nafaqada beeraha, qashinka korontada iyo qashinka halista ah degmada aad mas'uul ka ah.

fti FÖRPACKNINGS & TIDNINGS INSAMLINGEN

# Sidan ayaad u kala saareysaa:

Dhamaan Baakooyinka oo idil waa in la faaruqiya oo la qalajiyo. Baakooyinka iyo waxyaalaha kala duwan waa in la kala sooca. Haddii taasi ay suurto gal noqon karin, u kala sooc baakooyinka hadba waxa ugu culus.

## BAAKADAHA BALAASTIKADA KA SAMAYSAN

Tusaale: quraaradaha, kombooyinka, jirikaanno iyo baaldiyada yaryar, bacda balastiga wax lagu qaat, bacda balastiga wax lagu duubo (tusaale ahaan dukaanada khudaarta iyo khudrada) baakeedada dib wax loogu shubto, bacda jibiska iyo goomada.

**Sidatan yeel:** Furka iyo daboolka ka saar. Ku faaruqi bacdaada baakadaha baalaastiga ka sameysan weelka si ay midkastaa kaligeed u kala taalo. Waxay hadhow dhib yaraynaysaa dib u uga faa'iideysiga.

**Ha geynin** Waxyaalaha balastiga ah ee aan aheyn baakeedada waxa loo geynayaa sida qashinka isku jira ama ka guriga, tusaale ahaan, qalabka guryaha, alcaabta iyo cajaladaha fidyooga. Quraaradaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynayaa si lacag looga helo.

## BAAKOOYINKA XAANSHIDA

Tusaale: baakada baastada, caanaha iyo casiirka, kiishka warqada, kartoonka kabaha, xaanshida musqusha, kartoonada.

**Sidatan yeel** Kala bixi, kadib isku keen. Baakooyinka yaryar dhexgeli kuwa waawayn si aad boos u keydsato.

**Ha geynin** Bushqada waxaa la dhex dhiga khashinka aqalka/ama qaybta la gubiyo karo. Xaanshida-wargeysyada, kuwa xayeeysiinta iwm waxaa la dhexdhiga weelka loogu talagalay wargeysyada.

## BIRTA WAX LAGU SHUBTO

Tusaale: Qasacadaha raashinka, qasacadaha daawada naadafada ee la buufiya ku jiraan, tuubooyinka, furarka iyo daboolada, qasacadaha rinjiga.

**Sidatan yeel** Qalaaci furka seefta ee qasaacadaha. Furku ha ku xidhnaado tuunbadee ku daa.

**Ha geynin** Daasada uu ku hadhsan yahay rinjiga iyo hadhaaga xabagta taas waxa loo geynayaa sida khashin khatar ah. Birta duugga ah, ta qaybo tuubooyinka kulalinta, fantilayshanka iyo fayo-dhowrka digsiyo iyo alaabooyinka kale, taas oo aan baakooyinka ahayn, ayaa la geynayaa sidii qashinka isku jira ama guriga. Daasadaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynayaa si lacag looga helo.

## DHALADA WAXLAGU SHUBTO

Tusaale ahaan: quraaradaha iyo daasadaha midabka leh iyo kuwa bilaa midabka ah.

**Sidatan yeel** Ka fur afka, daboolka iyo furka kadibna kala saar sida alaabtaas looga faa'iideysto. Gee quraaradaha midabka leh iyo kuwa aan midabka laheyn midwalba weelka loogu talo galay.

**Ha geynin** Quraaradaha la soo celiyo ayaa dukaanka la geynayaa si lacag looga helo. Booshiliinka, dhoobada iyo waxyaalaha kale, ee aan aheyn baakadaha, sida qashinka isku jira ama ka guriga. Guluubyada iyo laanbadaha ayaa caadi ahaan la geynayaa xarunta dib uga faa'ideysiga ee kamuunka.

## WARGEYSYADA

Tusaale: Wargeysayada maalin iyo todobaadlayaasha ah, joornaalada, kaatalogyada, waraaqaha xayaysiiska, broshiirada iyo waraaqaha qoraalka-/sawiraada, buugaagta yaryar.

**Sidatan yeel** Ka saar bacda balastiga iyo xaashiyaha xayeysiiska ee ku dhagan ka hor inta aan waxyaalaha wax lagu daabaco la saareyn weelka qashinka.

**Ha geynin** Bushqada iyo buugaagta isku xidhan waxa la geynayaa qadhinka guriga/ la gubayo. Bacaha wax lagu qaado kartoon iyo wixii la mid ah waxaa lagu ridayaa weelka waraaqaha kartoonka.

FTI 2015 maarso